

# KHARASHKA AASKA EE DADKA U DHINTA COVID-19

Kharashka aaska ee dadka u dhinta COVID-19 waxaa laga codsan karaa Federal Emergency Management Agency (Wakaaladda Federaalka ee Maareynta Xaaladaha Degdegga ah ama FEMA)

## Yaa xaq u leh?

Si xaq loogu yeesho kaalmada aasidda:

- Waa in ay geeridu ka dhacdo Dalka Mareykanka, sida dhulka Mareykanku ka taliyo iyo magaalada caasimadda ah ee District of Columbia.
- Caddeynta dhimashada waa in ay sheegeyso in ay sababta geeridu tahay ama la xiriiro COVID-19.
- Qofka soo codsanaya kaalmada waa in uu haysto dhalashada Mareykanka, deggenaansho joogto ah, ama waa inuu yahay qof ah magangelyo-doone sharci ah intii ka dambeysay 20-kii Janaayo, 2020.
- Ma jiraan shuruudo ah in uu qofka dhintay haystay dhalashada Mareykanka, inuu haystay deggenaansho joogto ah, ama inuu ahaa magangelyo-doone sharci ah.

## Maxaa lagu bixin karaa kaalmada lacageed?

Kaalmada aasidda waxaa lagu bixin karaa kharashaadka aaska, haynta, gubidda, naxashka, dhuka aasidda, calaamadda qabriga, iwm. ilaa iyo \$9,000 halkii qabri. Faahfaahin dheeraad ah ka eego barta intarnetka ee FEMA [www.fema.gov/disasters/coronavirus/economic/funeral-assistance/faq](http://www.fema.gov/disasters/coronavirus/economic/funeral-assistance/faq).

## Sidee baa lacagta lagu helayaa?

Qofkii xaq u leh kaalmada aasidda waxaa jeegga lacagta loogu soo dirayaa cinwaanka guriga ama koonto bangi ayaa toos loogu soo ridayaa, oo qofka ayey ku xiran tahay sida uu rabo.

Wixii faahfaahin ah iyo dadka soo codsan kara, tusaaleyaal ah kharashaadka la bixinayo, iyo macluumaadka kale ee Funeral Assistance Program (Barnaamijka Kaalmada Aasidda) ee COVID-19 waxaad ka eegataa bogga Su'aalaha iyo Jawaabaha ee Funeral Assistance (Kaalmada Aasidda) ee FEMA:

[www.fema.gov/disasters/coronavirus/economic/funeral-assistance/faq](http://www.fema.gov/disasters/coronavirus/economic/funeral-assistance/faq).

## Soo-sheegidda Khiyaamada

FEMA waxaa soo gaaray warbixin la xiriirta qalin-shubato dadka u sheegta in ay isku diiwangeliyaan kaalmada aasidda. FEMA ma soo dirto wax farriimo ah oo uma sheegto dadka in ay isa soo diiwaangeliyaan ka hor inta aysan soo codsan kaalmada.

## Sida loo soo codsanayo:

### Tallaabada 1-aad: Go'aanso qofka noqonaya codsadaha iyo qofka iskula qoraya codsiga.

Qoysasku waa in ay go'aansadaan qofka u noqonaya codsadaha iyo qofka iskula qoraya codsiga. Laba qof magacyadood oo keliya ayaa lagu qori karaa codsiga.

### Tallaabada 2-aad: Diyaarso waraaqaha muhiimka ah oo dhan.

Codsadaha waa in uu haysto waraaqaha muhiimka ah ka hor inta uusan soo garaacin taleefanka lacag la'aanta ah ee Kaalmada Aasidda COVID-19.

- **Caddeynta dhimashada oo la soo xaqiijiyey\*** oo sheegeysa in ay qofka geeridiisu ahayd ama la xiriirtay COVID-19. Waxa kale oo jirta in caddeymaha geerida ay noqon karaan in geerida qof ku timid "ay sabab u noqon kartay" ama "in ay ahayd natiijo ka timid" COVID-19 ama "calaamadihii qofka soo ritay ee COVID-19" ama waxyaabo la mid ah oo muujinaya in ay sababaha dhimashada ku jirtay COVID-19.
- **Waraaqaha kharashka aasidda** (sida caddeymo faahfaahsan, heshiiskii xafiiska aasidda, iwm.) oo waa in ay ku qoran yihiin magaca codsadaha, kharashka lacagta aasidda, iyo taariikhaha la bixiyey kharashaadka aasidda.
- **Caddeymaha lacago kaalmo kale wixii la helay**, haddii ay qoysku heleen lacago kale (sida lacagaha Funeral Cemetery Aids Program (Barnaamijka Kaalmada ee Xabaalaha) Wisconsin, lacag-u-celinta loo sameeyo ciidanka difaaca dalka, iwm.)

### Tallaabada 3-aad: Soo garaac taleefanka Kaalmada Aasidda COVID-19.

Wakiil ka socda FEMA ayaa kugu caawin doona buuxinta codsiga.

- Qofkii raba luuqado kale ayuu ku buuxin karaa codsiga.
- **Codsiga lagu soo buuxiyo intarnetka lama aqbali doono.**

**Taleefanka Kaalmada Aasidda ee COVID-19**  
Codsiyadu waxay ka soo bilaabanayaan  
12-ka Abriil, 2021

844-684-6333 | TTY: 800-462-7585

Saacadaha Shaqada

Isniin ilaa Jimce

8-da ilaa 8-da Saacadda Gobolka / Central Time

### Waraaqaha loo soo Gudbinayo FEMA

- **Xaqiijinta caddeynta dhimashada**
  - Caddeynta dhimashada waa in naloogu soo diro boostada.
  - Koobiyada caddeynta dhimashada (koobbi caadi ah, intarnetka in sawir lagu soo diro, iyo fakis ahaan) midkoodna lagama aqbalo gobolka Wisconsin. Lama aqbalayo in koobbi la soo diro, laakiin codsade kasta waa in uu soo diro bakhshad xiran oo aan qofna furin oo ay ku jirto waraaqda caddeynta dhimashada.
  - Waraaqaha koobbiga ah lama soo celinayo.
- **Caddeynta kharashaadka aasidda iyo lacagaha kale ee ay dadku heleen:** Qoysasku waa in ay caddeymaha kaalmada dhaqaale ee ay heleen ku soo gudbiyaan kadinkooda intarnetka ama koontadooda FEMA ee DisasterAssistance.gov, ama fakis ahaan, ama boostada.

\*Waxaa gobolka Wisconsin sharci darro ka ah in la keeno koobbi ah caddeynta dhimashada. Codsadeyaashu waa in ay haystaan caddeynta dhimashada oo ku jirta bakhshad aan la furin oo ka socota Register of Deeds Office (xafiiska diiwaanka ee geerida deegaanka) oo waa inaad u soo dirto FEMA. Waraaqaha la soo diro oo dhan lama soo celinayo. Codsadeyaasha waxaa si adag loogu sheegayaa in ay dalbadaan caddeymo dhimasho oo dheeraad ah marka ugu horreysa ee ay sugayaan caddeyntooda dhimashada. Caddeynta dhimashada ee ugu horreysa qiimaheedu waa \$20, dabadeedna caddeyn kasta oo aad ka codsato oo dheeraad ah waa \$3 balse waa caddeyn la soo xaqiijiyey. **Lacagahaasi waxay ay ka mid yihiin kuwa la isku celin doono ee ku jira kharashka aasidda.** Si lagaaga caawiyo inaad la xiriirto Register of Deeds Office (xafiiska diiwaanka ee geerida deegaanka), booqo [www.wrdaonline.org](http://www.wrdaonline.org).